

SET OF NUMBERED MULTILINGUAL SCHOOL NOTICES
SOMALI

LIST OF NOTICES IN ENGLISH

Notice No 1	Information regarding parent participation
Notice No 2	Participation in Parent/Teacher interview
Notice No 3	Special Event/ Meeting/Function
Notice No 4	Prep intake
Notice No 5	Student Excursion Consent Form (for excursions not requiring school council approval)
Notice No 6	End of term
Notice No 7	No school
Notice No 8	Collection of EMA
Notice No 9	Travel card
Notice No 10	Transition
Notice No 11	Exit from English Language School or Centre
Notice No 12	Medical-condition
Notice No 13	Immunisation records
Notice No 14	Fees and levies
Notice No 15	Student absence
Notice No 16	Swimming Program
Notice No 17	Meeting Request
Notice No 18	List of items required for an excursion

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Waxaa jira siyaabo badan oo aad uga qaybgeli karto dugsiga ilmahaaga. Dugsiga ayaa ku siinaya macluumaadka ku saabsan siyaabaha aad ku caawin karto aadna uga qaybgeli karto waxbarashada ilmahaaga. Waxaa kaloo lagugu casuumayaa inaad ka qaybgasho dhinacyada barnaamijyada dugsiga.

Inta lagu jiro sannadka waxaa lagugu casuumi doonaa inaad soo qaybgasho adoo yimaada kulannada, munaasabadaha ama xafladaha kale oo uu dugsigu qaban qaabiyo. Kulannada qaarkood waxaa loo qaban doonaa si macluumaad loogu siiyo ku saabsan manhajka lagu barto kuwa kalena waxaa loo qaban doonaa si looga wada hadlo horumarka ilmahaaga.

Waxaad kaloo ka qaybgeli kartaa nashaadyada dugsiga adoo lagu doorto guddiga dugsiga oo aad noqoto xubin guddiga ama gacan gaysato si loo abaabulo nashaadyada dugsiga ee guud.

Haddii aad jeceshahay wax macluumaad ah oo ku saabsan Naadiyada Waalidiinta ama Guddiga Dugsiga fadlan la soo xiriir dugsiga.

Fadlan la xiriir macalinka ilmahaaga, Maamulaha ama xubnaha kale ee shaqaalaha haddii aad doonaysid inaad kala hadasho arimaha ku saabsan ilmahaaga ama dugsiga.

Saxiixa.....

Taariikhda.....

(School letterhead/logo)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Waxaa..... , lagugu casuumayaa inaad dugsiga timaado aadna la kulanto
(date/Taariikhda)

.....(name of teacher/s/ Magaca Macalinka)

Oo kala hadasho horumarka ilmahaaga iyo barnaamijyada dugsiga. Kulankan waxaa lagu magacaabaa wareysiga waalidka-iyo-macalinka. Waxay ku siinaysaa fursad aad uga hadasho arimaha jira, ku siinaysaa macluumaad ama aad su'aalo ka weydiiso waxbarashada ilmahaaga. Maaddaama waxbarashadu ay ku jiraan iskaashi u dhaxeeya waalidiinta, macalimiinta iyo ardayda, danahaaga iyo ka qaybgalkaagu kulankan waa muhiim.

Waxaan sugaynaa inaan kugula kulano halkaas.

Saxiixa

Taariikhda.....

-----X

Fadlan SOO BUUXI, SOO GOY SOONA CELI qaybtan foomka.....
(date/Taariikhda)

Magaca Waalidka / Weliga:.....

Magaca ardayga: Heer Sannadeedka:

Fadlan soo sheeg waqtiga kuugu habboon wareysiga adigoo sax ku dhiga khaanadda kugu habboon.

-
-
-
-

Turjumaan ayaa loo baahan yahay.....
(language/Somali)

Saxiixa.....
(Parent/Guardian/Waalidka/Weliga)
Taariikhda

(School letterhead/logo)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,,

Waxaa lagugu casuumayaa inaad timaaddo munaasabad ka jirta dugsiga. Tani waa fursad weyn oo aad ku baran karto dugsiga si fiican aadna kula kulmi karto macalimiinta iyo waalidiinta kale.

galabta macluumaad-siinta waalidiinta/weliyaasha ardayda dhigata _____

kulan macluumaad oo looga hadlayo kaamka dugsiga _____

dhammadka xafladda teeramka /sannadka

karnifaalka dabaashada/cayaaraha dugsiyada

shaahaynta subaxdii ee waalidiinta/weliyeyasha

munaasabad gaar ah ee _____

kuwa kale _____

Waxaa lagu qaban doonaa

Maalinta _____ saacadda _____.

turjumaan ayaa la keeni doonaa turjumaan lama keeni doono

Waxaan rajeynaa inaad imaan doonto waxaana sugaynaa inaan halkaas kugu arki doono.

Saxiixa.....

Taariikhda.....

Fadlan SOO BUUXI, SOO GOY SOONA CELI qaybtan foomka (Date/Taariikhda)

Waan imaan doonaa. Magaca ilmahaygu waa

Waxaan u baahan doonaa turjumaan **haddii la heli karo**

Turjumaan ayaa loo baahan yahay.....

Saxiixa

Taariikhda

(School letterhead/logo)

(Date/ Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada,

Waxaan ku faraxsanahay..... (student's name/Magaca ardayga) inuu iman doono dugsiyaga sannadka soo socda. Waxaa lagugu casuumayaa inaad dugsiga timaaddo ka-hor intuuusan sannadku bilaaban, si aad ula kulanto ulana hadasho macalinka ilmahaaga. Waxaan ku faraxsanahay inaan kaala hadalno wax kasta oo la xiriira ilmahaaga iyo nashaadyada dugsiga iyo sidoo kale siyaabaha adiga iyo shaqaalaha dugsiga u wada-shaqayn lahaydeen si loo hubiyo bilowga dugsiga ee ilmahaaga oo najax ah iyo raaxo leh

Waan ka mahadcelinaynaa haddii aad dugsiga timaaddo.....(time/ Waqtiga) muddada.....(date/ Taariikhda)

Fadlan soo wado ilmahaaga. Xubnaha qoyska ee kale ayagana waa iman karaan.

Waan ka mahadcelinaynaa haddii aad dugsiga timaaddo(time/Waqtiga) muddada.....(date/Taariikhda)

Fadlan soo wado ilmahaaga. Carruurta kale ayagana waa iman karaan.

Saxiixa.....

Taariikhda.....

Fadlan SOO BUUXI, SOO GOY SOONA CELI qaybtan foomka
(date/Taariikhda)

Magaca Waalidka/Weliga:

Magaca Ardayga:

- Waxaan awoodi doonaa inaan imaado dugsiga saacadda
(date/Taariikhda) (Time/ Waqtiga)
- Maan awoodo

Turjumaan ayaa looga baahan yahay:
(Language/Somali)

Saxiixa.....
(Parent/Guardian/Waalidka/Weliga)

Taariikhda

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Magaca dibad-baxa gaaban:

Meesha la tegi doono:

Taariikhda dibad-baxa gaaban:

Waqtiyada la baxayo iyo waqtiyada la soonoqonayo:

Ardaydu waxay raaci doonaan: bas tareen traam socod

Xubnaha shaqaalaha iyo kormeerka:

Qarashka:

Qadada:

- Ilmahaagu waa inuu soo qaataa qado iyo cabitaan oo ku jira weelal aan jabayn.
- Qadada waxaa la soo gadanb karaa inta lagu jiro dibad-baxa \$.....
- qarashka qadada wuxuu ku jiraa qarashka dibad-baxa.

Dharka iyo qalabka loo baahan yahay:

Magaca qofka xiriirka degdegga ee dibad-baxa iyo faahfaahinta xiriirkaas:

Kuwa kale:

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama dareeno ah, fadlan la soo xiriir.....

..... (phone number/Lambarka taleefanka).

Ogolaanshaha waalidka:

Waxaan siiyey ogolaansho gabadhayda/wiilkayga

(full name/Magaca oo Dhan)

Inuu ka qaybgalo.

Waalidka / Weliga

(full name/ Magaca oo Dhan)

(signature/saxiixa)

(date/Taariikhda)

In case of emergency I can be contacted on:

Markii wax degdeg ah jiraan waxaa laygala soo xiriiri karaa:

_____ OR/AMA:
Phone/Taleefanka

_____ Phone/ Taleefanka

OGOLAANSHAHA DAAWEYNTA CAAFIMAAD

Markii macalinka masuulka ka ah dibad-baxa uusan awoodin inuu ila soo xiriiro, amase aysanba suurtagal ahayn in layla soo xiriiro, waxaan awood u siinayaa macalinka masuulka ah inuu:

- u ogolaan karo ilmahaygu inuu helo daaweyn caafimaad ama qalliinba sida uu u arko dhaqatarka inay lagama maarmaan tahay
- u sameeyo gargaarka degdegga ah siduu macalinka masuulka ah u arko inay lagama maarmaan tahay.

Saxiixa Waalidka / Weliga:

Taariikhda:

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Waalidka/Weliga Sharafta leh,

Dugsigu wuxuu dhammaan doonaa
(day/Maalinta) (date/ Taariikhda)

saacaddaee teeramka/dhammadkii fasaxa sannadka.
(time/waqtiga)

Dugsigu wuxuu bilaaban doonaa saacadda..... a.m.
(day/Maalinta) (date/ Taariikhda) (time/Waqtiga)

Saxiixa

Taariikhda

(School letterhead/logo)

(Date/ Maalinta)

Waalidka/Weliga Sharafta leh,

Dugsi ma jiri doono maalinta.....

(day/ Maalinta)

(date/Taariikhda)

Fadlan dugsi ha u soo dirin ilmahaaga/carruurtaada maalintaas.

Sababta waxay tahay:

Maalinta Fasaxa-Ardayda
(Maalinta Manhajka ee macalimiinta oo keliya)

Fasax-weynaha Dadweynaha

Kuwa kale

Saxiixa.....

Taariikhda

.....

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Jeegga haftada kowaad/labaad ee Gunnada Kabidda Waxbarashada (Education Maintenance Allowance) ayaa la keenay dugsiga. Waxaan kaa codsanaynaa inaad dugsiga timaaddo qof ahaan oo aad qaadato jeegga aadna saxiixdo. Fadlan soo qaado warqaddan.

Saxiixa.....

Taariikhda.....

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Kaararka Ka-dhimista Socdaalka wuxuu ardayda taraa inay raacaan gaadiidka dadweynaha ayagoo ku helaya qiyaasta ka-dhimista oo hooseysa.

Ardayda ku qoran dugsiga waxay xaq u leeyihiin kaararka ka-dhimista. Si loo codsado Kaarka Ka-dhimista Socdaalka ee Ardayga waalidiintu waa inay soo buuxiyaan foomka codsiga, kaas oo laga helo dugsiga ama istayshanada tareenka, ayna soo raaciyaan laba sawir oo kuwa baasaboorka oo kale ah ee ilmahooda. Foomka codsiga oo la soo buuxiyey iyo sawirada waa inuu dugsigu soo shaabadeeyaa lana keenaa istayshanka tareenka.

Kaararka ka-dhimista waxaa la isticmaali karaa toddoba maalmood asbuucii. Fadlan la soco in sharci ahaan loo baahan yahay in dadka rakaabka ah ay mar kasta wataan Kaarka Ka-dhimista Socdaalka ee Ardayga oo socda ayna bixiso Victorian Public Transport (VPT) markii ay ku raacayaan tikidhka kirada ka-dhimista ah ayna la socdaan gaadiidka dadweynaha. Ganaaxyo ayaa jiraya haddii Kaarka Ka-dhimista Socdaalka ee Ardayga oo socda aan la wadan markii la codsado.

Haddii ardayda ka lumo kaarku waa inay bixiyaan \$ oo ujradda baddalidda ah.

Saxiixa

Taariikhda

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah ama aad qabto su'aalo la xiriira adeegga gaadiidka dadweynaha METLINK ayaa samaysay khadka taleefanka turjumaanka ah.

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Waxaa la igula taliyey in ilmahaaga

(Name/Magaca)

Uu dhigan doono Sannadka 7aad sannadka soo socda:

(School/Dugsiga).....

(Address/Cinwaanka)

.....

.....

.....

Taleefanka:

Waa inaad la soo xiriirtaataleefanka.....

(name of contact person and position/magaca qofka la xiriirayo iyo jagada)

(phone/taleefanka)

Haddii aad doonaysid inaad ka hadasho waxyaalo dheeraad ah ee dugsiga ku saabsan, sida dugsiga-ku-qoridda, yunifoomka.

Saxiixa

Taariikhda

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Ilmahaaga,, wuxuu dhammaystay Koorsadii Luqadda
(Name/Magaca)

Ingiriisiga wuxuu diyaar u yahay inuu tago fasalada dugsigaa caadiga ah. Asagu/ayadu waxay tegi doontaa:

DUGSIGA:

XIRIIRKA

QOFKA:

TALEEFANKA:

Haddii aad qabto wax su'aalo ah waxaad la soo xiriiri kartaa Dugsiga/xarunta Luqadda:

.....taleefanka

(Contact person/Qofka Lala Xiriirayo)

(Phone/Taleefanka)

Saxiixa

Taariikhda

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Dugsiga waa in loo soo sheegaa haddii uu ilmahaagu qabo xaalad caafimaad oo doi muddo dheer ah, (tusaale, asmada ama neefta, qalalka, aleerjikada, sonkorwoga, talaseemia, hoomofiilia, ama xaaladda wadnaha) taas oo saamayn karta asagaayada markii asagu/ayadu dugsiga joogaan. Dhammaan macluumaadka oo dhan waa mid qarsoodi ah.

Dhammaan daawada lagu qaato dugsiga waa inay ku qoran yahay magaca ilmahaaga, dhooska la qaadanayo iyo waqtiga la qaadanayo.

Dhammaan daawada waa in loo dhiibaa macalinka, inaad macalinka heshiis kale la samaysatay mooyee, (tusaale, daawada asmada waxaa badanaa wata ardayga).

Qandho-jebiyeyaasha baabi'ya qandhada waxaa keliya la siin karaa marka la haysto ogolaanshaha waalidka/weliga.

Haddii aad doonaysid inaad ka hadasho xaalladda caafimaad ee ilmahaaga, fadlan ka soo wac.....

(name/Magaca)

Taleefanka ah..... si aad u samaysato ballan.

(phone/taleefanka)

Saxiixa

Taariikhda

(School letterhead/logo)

(Date/ Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Ardayda waxaa looga baahan yahay inay keenaan shahaadada tallaalka marka kowaad ee lagu qorayo dugsiga hoose ee Victoria.

Shahaadadu waxay sheegaysaa bal in ilmaha laga soo tallaalay jix-dheerta, teetanaha, dabaysha, jadeecada, qaama-qashiirka, curyaamidda, qix-dheerta hargabka hoomofiilaska Nooca B.

Ardayda ku kala wareegaysa dugsiyada waxaa looga baahan yahay inay keenaan shahaadada tallaalka. Tallaalku waxaa laga heli karaa dowladaha hoose, xaruumaha caafimaadka hooyada iyo ilmaha iyo dhaqaatiirta degaanka.

Ardayda kuwaas oo aan tallaalnayn waxay weli dhigan karaan dugsiga. Haddii ay dugsiga ka dhacdo faafitaanka cudurada lays-qaadsiyo ardaydaas waxaa loo dirayaa gurigooda ilaa khatarta ka dhammaato.

Haddii ilmahaaga la tallaalay, fadlan huubi inaad haysato shahaadadii tallaalka markii aad dugsiga imaanaysaan si aad ilmahaaga ugu qorto dugsiga.

Saxiixa

Taariikhda

(School letterhead/logo)

(Date/ Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Dugsiyadu waxay lacag ka helaan Wasaaradda Waxbarashada iyo Tarbiyada Carruurnimada Hore si uu u bixiyo barnaamijyada dugsiga hase ahaatee waxaa la filayaa in waalidiintu inay keenaan, ama dugsiga lacag ku siiyaan si uu u keeno buuggagta maaddooyinka, waxyaalaha isteeshinariga ah, dibad-baxyada, kaambooyinka iyo nashaadyada dhaqmeed, iyo qalabka manhajka ee maaddooyinka farsamada halkaas oo ardaydu guriga u soo qaataan waxyaalaha ay soo dhameeyeen.

Sannadkan waalidiinta waxaa laga codsanayaa inay ku deeqaan \$..... waxyaalahaas.

Intaas kore waxaa raaca, guddiyada dugsiyadu badanaa waxay waalidiinta ka codsadaan inay si istikhyaar ah ugu tabarucaan si ay gacan uga gaystaan lacag-u-ururinta dugsiga.

Sannadkan waalidiinta waxaa la waydiistey inay bixiyaan \$. Lacagtaas waa mid istikhyaar ah.

Dugsiyadu wuxuu bixin karaa talooyin ku saabsan taageerada dhaqaale oo ay heli karaan waalidiintu. Fadlan la xiriir dugsiga haddii aad jeceshahay inaad kala hadasho qaabab lacag bixineed kale.

Saxiixa

Taariikhda.....

(School letterhead/logo)

(Date/ Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Waxaan dareen ka qabnaa in (student’s name/Magaca ardayga) dhigta

Sannadka uu ka maqnaa dugsiga maalinta.....
(day/s and date/s / maalinta iyo taariikhda)

iyo
(day/s and date/s / maalinta iyo taariikhda)

Fadlan ku soo sheeg sababta maqnaashiisa/heeda warqaddan hoose soo-celi una soo dir dugsiga sida ugu dhaqsaha badan.

Haddii wiilkaagu/gabadhaadu uga maqnaa dugsiga ogolaanshahaaga la’aantiis, fadlan ma la soo xiriiri kartaa dugsiga si arinta looga wada-hadlo mar kale.

Saxiixa.....Taariikhda.....

Fadlan SOO BUUXI, SOO GOY SOONA CELI qaybtan foomka sida ugu dhaqsaha badan.

Wiilkayga/gabadhaydawuxuu ka maqnaa dugsiga
(student’s name/ Magaca ardayga)

.....
(day/s and date/s / maalinta iyo taariikhda)

Sababaha soo socda:

- Jirro ballanta dhaqtarka ballanta ilkaha
- ganacsiga qoyska maqnaansho ogolaanshahayga **la’aantiis**
- sababo kale (sheeg faahfaahintooda)

Saxiixa
(Parent/Guardian/Waalidka/Weliga)

Taariikhda.....

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Waalidiinta/Weliyada Sharafta leh,

Barnaamijka dabaasha dugsi waxaa la qaban doonaa (goobta).....
.....(address/Cinwaanka)

Maalinta.....inta u dhaxaysa.....
(dates/ Taariikhda) (times/waqtiga)

Barnaamijka dabaasha dugsi waxaa loogu talagalay ardayda oo dhan.

Ardayda waxaa la socda oo kormeeraya macalimiintooda waxaana dabaasha bara aygoo kooxo ah macalin dabaasha.

Fadlan u sheeg ga macalinka badhaada/wiilkaaga wixii duruufo ah oo ay tahay in dugsi ka warhayo, tusaale xaalladda caafimaad.

Ardayda waxay u baahan doontaa waxyaalaha soo socda kulan kasta:

- dhar-qubays
- shukuman
- koofida qubayska (haddii loo baahdo) googalo (haddii loo baahdo)
- dharka raaxada tus. Taraag-suudka

Barnaamijka dabaasha wuxuu qarasha ahaan noqonayaa \$ halkii kulanba.
(isugaynta qarashka \$)

.....Saxiixa

Fadlan SOO BUUXI, SOO GOY SOONA CELI qaybtan foomka
(date/taariikhda)

Waxaan siiyey/ma siin ogolaansho _____, Heer Sannadeedka: ,
(student’s name/magaca ardayga)

Inuu ka qaybgalo barnaamijka dabaasha dugsi.

waxaan doonayaa inaan bixiyo \$ halkii casharba.
AMA

waxaan doonayaa ininaan bixiyo barnaamijka dabaasha oo dhan. Waxaa halkan ku xiran \$

Fadlan la xiriir dugsi haddii aad doonaysid inaad ka hadasho qaababka lacag-bixineed ee kaleeto.

Saxiixa.....
(Parent/Guardian / Waalidka/Weliga)

Taariikhda

(School letterhead/logo)

(Date/Taariikhda)

Mudane/Marwo

Waxaan doonayaa inaan kugu casuumo:

- kulan, si looga wada-hadlo warbixinta dugsiga ee ilmahaaga.
- kulan, si looga wada-hadlo horumarka ilmahaaga
- kulan, si looga wada-hadlo maqnaanshaha ilmahaaga ee dugsiga

Fadlan imow dugsiga _____ saacadda _____

Si aad u aragto _____.

Haddii loo baahdo turjumaan ayaa la keeni doonaa kulankan.

Waxaan rajaynaynaa inaad timaaddo. Fadlan la xiriir dugsiga maalintahaddii aadan iman karin waqtigaas aadna doonayso inaad samaysato waqti kale ee kulan
Saxiix.....

Taariuikh.....

Fadlan SOO BUUXI, SOO GOY SOONA CELI qaybtan foomka (Date/Taariikhda)

Anigoo ah waan iman doonaa/ma iman doono. Magaca ilmahayga waa

Waxaan u baahan doonaa turjumaan **haddii la heli karo** turjumaan looma baahan doono. Turjumaan ayaa loo baahan yahay.....

Saxiixa

Taariikhda

Ardaydu waa inay kaambada u soo qaataan waxyaalaha saxda lagu qoray ✓ ee hoose.
Waxyaalaha oo dhan waa in lagu calaamadeeyaa magaca ardayga.

1. SEEXASHADA

- | | | |
|---|--|---|
| <input type="checkbox"/> buste | <input type="checkbox"/> baagag seexashada | <input type="checkbox"/> dacas |
| <input type="checkbox"/> barkin yar | <input type="checkbox"/> bijaamas | <input type="checkbox"/> joodari la buufiyo |
| <input type="checkbox"/> dirinta seexashada | | |

2. DHARKA MAALINTA LA XIDHO

- | | | |
|--|---|---|
| <input type="checkbox"/> jiinaska/surwaal dheer | <input type="checkbox"/> koofida qoraxda | <input type="checkbox"/> koofi dhaxanta |
| <input type="checkbox"/> daba-gaab | <input type="checkbox"/> masarka | <input type="checkbox"/> koofida roobka |
| <input type="checkbox"/> shaati | <input type="checkbox"/> sokisyo | <input type="checkbox"/> galoofyo |
| <input type="checkbox"/> dhar hoosaad | <input type="checkbox"/> jambarka qabowga | <input type="checkbox"/> jaambar suufka |
| <input type="checkbox"/> shaatiga gacma dheeraha qabowga ama kuwa korka laga gashado | | <input type="checkbox"/> dhar-hoose qabow |
| <input type="checkbox"/> parka ama koodhka roobka | <input type="checkbox"/> kabaha lagu ordo | <input type="checkbox"/> buud |
| <input type="checkbox"/> kabaha socodka | <input type="checkbox"/> sandalo | <input type="checkbox"/> dacas |
| <input type="checkbox"/> dharka qubayska | | |

3. WAXYAALAHA SHAQSIGA AH

- | | | |
|---|---|-------------------------------------|
| <input type="checkbox"/> shukumaan | <input type="checkbox"/> iskiriinka qoraxda | <input type="checkbox"/> shanlo |
| <input type="checkbox"/> xasharaad-celiye | <input type="checkbox"/> tishuu ama fasaleeti | |
| <input type="checkbox"/> shambada timaha | <input type="checkbox"/> saabuun | <input type="checkbox"/> dhalo biyo |
| <input type="checkbox"/> baahiyaha caafimaadka shaqsiyeed | | |

4. CUNIDDA

- | | | |
|---|-------------------------------------|-------------------------------|
| <input type="checkbox"/> baleedh | <input type="checkbox"/> baaquli | <input type="checkbox"/> koob |
| <input type="checkbox"/> mindi/fargeeto/qaado | <input type="checkbox"/> shaah miir | |

5. WAXYAALO KALE

- | | | |
|---|---|----------------------------------|
| <input type="checkbox"/> buugga layliga/ buugga qoraalka | <input type="checkbox"/> qalin ama laabis | <input type="checkbox"/> kaamira |
| <input type="checkbox"/> baaga balaastiga ee loondariga | <input type="checkbox"/> tooj iyo batari | |
| <input type="checkbox"/> boqshada cinwaan leh oo istaambo leh | | |

6. QARASH-GARAYNTA LACAGTA: In aan ka badnayn \$.....